# Warbixin ku saabsan (caabuqa qarsoon) daaweynta cudurka tiibishada.

## Waa maxay caabuqa tiibishada qarsoon?

Xaaladdan oo kale, qofka waxaa uu qaaday tiibisho, laakiin bakteeriyada tiibishada ayaa weli ku dhex hurda jirka oon sameyn wax dhaq dhaqaaq ah. Qofku ma laha calaamado, ma xanuunsanayo mana qaadsiin karo cudurka dadka kale.

Afar qaybood qayb ka mid ah dadka adduunka ayaa qaba caabuqa tiibishada qarsoon. Inta badan dadkaaswaxa ay qaadeen cudurkawaddamada ay intabadan ku badan tahay tiibishada (ku dhawaad dhammaan Aasiya, Afrika, Koonfurta iyo Bartamaha Ameerika, in badan oo ka mid ah Bariga Yurub). Waagii hore Finland waa ay ku badnayd cudurka tiibishada. Sidaa daraddeed ayaa dad badan oo Finland ku dhashay intii ka horreysay sannadkii 1950 kii ay carruur nimadoodii ama dhalinyaro nimadoodii qaadeen cudurka tiibishada.

## Maxay tahay sababta loo daweynayo caabuqa tiibishada qarsoon?

Daryeelka ujeeddiisu waa in jirkaaga laga baabi iyo dhammaan bakteeriyada tiibishada iyoin adan u xannuunsan.

Infekshanka tiibishada qarsoon waxaa suurtagal ah in mar ka id ah nolashaada ay soo kacdo xitaa adigoo qaaday tobonaan sano ka hor.  Markaas qofku waa uu xanuunsanayaa, waxa uuna helayaa calaamadihii cudurka, dadka u dhow ama qaraabadiisa waa uu qaadsiin karaa. Qatarta inaad jirrato waxay aad ugu badan tahay qiyaastii laba sano gudahood markaad cudurka qaadatid. Markaa kadib jirada waxa ay saameyn ku yeelaneysaa in awoodda is difaac ee jirkaaga ay si ku meel gaar ah ma si joogto ahay u yaraato.

## Caabuqa tiibishada qarsoon waxaa laga daaweeyaa kuwa qatarta aadka u leh in ay cudur ku noqoto

**Dadka tiibishada qaadikarawaakuwa intabadan ehelka ama asxaabta ah, sida kuwa isku guriga ku wada nool.** Waaxda caafimaadka ayaa go`aaminaysa kuwa la doonayo in laga baaro. Kaliya seddex meelood meel dadka la soo bandhigay ayaa qaaday cudurka tiibishada.

- Qiyaastii boqolkii qof ee qaangaarka ah oo uu ku dhacay cudurka tiibishada toban kamid ah ayaa qaadaya tiibisho. Kala bar laba sano gudahood iyo inta kalena inta ka hartay noloshaada.
- Mid ka mid ah labadii carruur ah ee da'doodu ka yar tahay 1 sano iyo mid ka mid ah afartii carruur ah ee ay da'doodu u dhaxayso 1- 5 jir ayaa laga yaabaa inuu qaado cudurka ka dib marka uu tiibishada Dhallinyarada aan qaangaarin iyo dhalinyarada qaangaarka ah ayaa sidoo kale halis ugu jira inay qaadaan cudurka marka loo eego dadka waaweyn. Sidaa darteed, cudurka waxaa laga raadiyaa dadka ay da'doodu ka yar tahay 35 jir.
- Qatarta cudurkan waxaa saamayn ku leh awoodda difaaca jirkaaga.  Baaritaanka ayaa la sameeyaa iyada oo aan loo eegin da'da haddii qofka la soo bandhigay uu leeyahay cudurrada yareeya awoodda difaaca jirka ama daawooyinka uu qaato.

**Cudurada iyo daawooyinka qalqal galinaya awoodda difaaca jirka, waxaa la sameeyaa baaritaan guud:**

- Caabuqa HIV
- Silicose (sanbabada sida boodhka dhagaxa ah)

- Marka la qorsheynayo in qofka xubin lagu beerayo
- Marka ay kelyaha aysan si  joogto ah aysan u shaqeeynin  waxaa loo baahan yahay kelyo macmal ah
- Marka la qorsheynayo in la bilaabo daaweynta bayooloji ahaanta  ama daaweynta joojinta JAK xannuunka ku dha kala goosyada

## Sidee loo ogaadaa caabuqa tiibishada qarsoon?

Dadka waaweyn waxaa laga qaadaa baaritaanka dhiigga (IGRA, Interferon Gamma Release Assay), carruurta ka yar 7 jir waxaa laga qaadaa baaritaanka maqaarka (Mantoux).

## Sidee loo daweeyaa caabuqa tiibishada qarsoon?

Kahor inta aan la bilaabin daaweynta, waxaa la hubsadaa in qofku uusan lahayn calaamado muujinaya tiibishada iyo in sawirka sambabada uu yahay mid caadi ah. Haddii loo baahdo waxaa qofka laga aruuriya candhuufta. Dhiigga la qaadayo waa la fiiriyaa hemoglobin, unugyada dhiigga cad, beerka, kelyaha iyo baaritaanka HIV.

Go'aanka daawaynta waxaa la sameeyaa ka dib tixgelin shakhsiyeed ah iyo wada hadallo kaddib.  Daaweyntu waa, haddii aad dooneyso ood ballan qaadeysid daaweynta. Daawaynta waxa lagu bilaaba laguna kormeeraa xarumaha daryeelka caafimaadka dad weynaha  (isbitaal ama xarumaha caafimaadka).  Baaritaanada iyo daryeelka daaweynta sida uu sharcigu dhigayo macmiilka waa u lacag la`aan ama bilaash.

Daryeelka waxaa la isticmaalaa daawooyinka tiibishada. Dhakhtarka ayaa dooranaya shaqsi walba daawada ama daawooyinka laysku daray ee ku haboon.  Daaweyntu waxay socotaa 3-9 bilood, iyadoo ku xiran xaaladda iyo isku darka daawooyinka. Daaweynta waxaa laga yaabaa in ay keento caqbado. Ka aqriso macluumaad dheeraan ah qoraaladda hagista bukaan socodka.

## Sidee waxtar u leedahay daawadu?

Daaweyntu waxa ay ka celinaysaa in tiibishada sii fiddo intabadan dadka daawooyinka qaatay.

## Daawooyinka ma qaadan karaa anoo uur leh?

Haddii aad uur leedahay waxaa la samaynayaa hab qorshe wanaagsan sidii loo bilaabi lahaa daryeelka daaweynta LTBI inta uusan uurku bilaaban ama iman.
Hooyada uurka leh qatarta infakshinka ama bararka beerka xoogaa waa ay badatay. Sidaa daraadeed waxaa wanaagsan in daaweynta la bilaabo marka ay dhasho 3 bilood kadib. Go'aanka daaweynta waxaa had iyo jeer loo sameeyaa si shaqsiyan ah, oo ku salaysan tixgelin taxadar leh. Daawooyinka tiibishada qatar uma keento ilmaha kujira uurka hooyada.

## Adiga is daryeel!

Waxaad ku xoojin kartaa habka difaacaaga qaab nololeedkaaga. Adiga is daryeel Cun cunto kaladuwan, samee dhaqdhaqaaq, seexo hurdo kugu filan.  Jooji sigaarka oo isticmaal khamriga si xadeysan. Iska ilaali in aad isku buuqdo.  Isticmaal fitamiin D-ga: midab

cad ugu yaraan xilliga mugdiga ah ee bisha tobnaad ilaa tan afaraad, midabka madowga isticmaal sannadka oodhan xilli kasta.

La xidhiidh dhakhtarkaaga haddii aad isku aragto qufac dheer, xab, xaako, cunto xumo, miisaan lumis, daal daran, ama dhidid habeenkii ah.

Ka aqriso macluumaad dheeraad oo tiibishada ah:www.tuberkuloosi.fi